



## Miyaa laga hortagi karaa TB?

Waxaa jiro tallaalka TB ee lagu magacaabo BCG. Hase-yeeshe, mar walba ma shaqeeyo, wuxuuna aad wax-tar u yahay carruurta yar si ay u qaadin nooca qaaxada ee ugu xun. Dalka UK, BCG waxaa laga tallaala ilmaha yar markii laga yaabo inay u dhowaadaan ama la degaan dad qabo jeermiiska TB ama waxaa lagu tallaalaa dadka wayn haddii ay qabtaan shaqo kordhinaayo halista ay ku qaadaan cudurka.

BCG ma ahan tallaal caadi ah oo la sameeyo safar ama dalxiis ka hor. Haddii aad rabtid in BCG lagugu tallaalo dalxiis awgiis, waxaa suurtogal ah inaad u baahan tahay inaad lacag bixiso iyo kiliniko khaas ah ka soo sameysato.

## Qaaxada miyuu yahay cudur caadi ahaan loo qaado?

TB waa cudur dhif ku ah dalka UK markii loo barbardhigo bilowga qarniga la soo dhaafey, laakiin tirada dadka qaba TB ayaa kordhey laga bilaabo 1990. TB wuxuu ku badan yahay dalalka horumaraaya halkaaso dad badan si fudud u heli karin daawada ay u baahan yihiin si ay u ficnaadaan.

## Miyuu qof walba ku dhici karaa TB?

Haa, qof walba ayaa qaadi karo TB. Liiska bukaanada horey u qabi jirey waxaa ka mid ah wasir ka mid ah dalka Ingiriiska, fannaan caan ah iyo baadariga kaniisada wayn, iyo dad kale oo badan. Hase-yeeshe, TB'ga wuxuu aad u saameeyaa dadka ku nool xaalado guriyeyn sabool ah ama cunto dhellitiran cunin, iyo sidoo kale dadka qabo cuduro kale ee tabar-yareeyo habka iska caabinta cudurada ee jirka, sida cudurka HIV.

Inkastoo qof walba ku dhici karo TB, waa dhif in dalka UK lala kulmo jeermiska TB. Labo ka mid ah hababka ugu wax-tar banadan ka hortagga TB waxay yihiin:

- Cudur-aqoonsiga horey, si loo joojiyo in dad kale loo gudbiyo cudurka
- In la laahaado habka iska caabinta cudurada oo xoog leh iyo caafimaad ah

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo khuseeya TB iyo si aad u akhriso sheekooyinka dhabta ah ee dadka kale ku dhacey cudurka, fadlan u booqo *The Truth About TB* (Runta Ku Saabsan Qaaxada) www.thetruthabouttb.org

TB Alert
Community Base
113 Queens Road
Brighton, BN1 3XG

Tel: 01273 234029
**www.tbalert.org**

Haddii aad su'aalo ka qabtid TB, ama rabtid inaad ogaato warar ka badan oo ku saabsan TB Action Group (TBAG) fadlan wac 01273 234770.

**TB Alert** waa urur samafal qarameed ee horyaal ku ah qaaxada. Barnaamajyadeena waxaa laga qabtaa UK, Hindiya iyo Afrika, waxaana xittaa si iskaashato ah la shaqeynaa qolooyin caalam ah si aan adduunka oo dhan ka hortagno TB'da. Wax-qabadyadeena waxay diiradda saaraan seddax qayb wayn:

- Kor u qaadida aqoonta u shacbiga ka qabo TB, iyo taageerida bukaanka intii ay daawada u socoto
- Isku keenida sharciyada adeegyada caafimaadka, ururyada mutaddaawiciinta iyo dadka uu TB saamayn ku yeeshey si loo qorsheeyo iyo bixiyo adeeg TB ka fiican
- Siyaasadaha wax soo saarka iyo codsiga iloyin lagu wanaajiyo xannaanada bukaanada, laga hortago iyo la xakameeyo qaaxada

Hawsheena waxaan ku taageerna ujeddada ururkeena oo ah in la kordhiyo helidda daaweyn wax-tar leh ee lagu daaweeyo dhammaan dadka qabo TB.

Macluumaad walba ee ku qoran buug-yarahaan kuna saabsan cudur-aqoonsiga iyo daaweynta qaaxada waxaa loogu talagalay oo kaliya in cudurka laga baxsho macluumaad guud. Looguma talagalin inay beddel u noqoto cudur-oaqoonsiga, xirfadda, khibradda iyo aqoonta takhaatiirta, farmashiistayaalka ama xirfadlayaasha caafimaad ee kale ee bukaanka xannaaneeyo. Dhammaan macluumaadka ku qoran buug-yarahaan looguma talagalin in lagu go'aamiyo cudur-aqoonsi ama daaweyn. Su'aal iyo wel-wel walba laga qabo cudur-aqoonsiga iyo daaweynta waa in loola tego xirfadlayaasha caafimaadka.

TB Alert waa shirkad dammaano ku xadeysan, ku diiwaangashan Ingiriiska Lamb. 3606528. Hay'ad samafal diiwangashan lamb. 1071886. photography: Gary Hampton (imagelibrary@iuatld.org) design: **worksong**, london 020 8352 8300 Revised 2013

# QAAXADA (TB) Su'aalahaada oo laga jawaabey




NHS





**Qaaxada (TB) waa cudur, badanaa dadka ma oga inay qabaan. Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay inuu ka jawaabo qaar ka mid ah su'aalaha badanaa la is-weydiiyo oo ku saabsan qaaxada.**

## Waa maxay qaaxada?

Qaaxada (TB) waa cudur oo jeermis sababo. TB'da badanaa wuxuu saameeyn ku yeeshaa sambabta, laakiin qaaxada meel walba ee jirkaaga ayuu ku dhici karaa. TB'da waxaa lagu daaweyn karaa antibiyootiko waqti dheer la isticmaalo, badanaa lix bilood. Qaaxada ku dhacdo sambabta ama dhuunta waa nooca kaliya ee faafi kara, waxaa kaani loola jeedaa in loo gudbin karo dad kale. Dadka badanaa cudurka ma faafiyaan labo usbuuc ka dib markii daawada saxda ah loo bilaabo.

## Sidee loo qaada TB?

Markii qof qaaxo ku qabo dhuunta ama sambabta uu qufaco ama hindhiso, jeermiska TB'da a hawada qaadaayo iyo dadka kale ayaa neefsan karo. Badanaa TB wuxuu kugu dhici karaa haddii waqti dheer la joogtey qof qabo TB, tusaale ahaan isla guri ku nooshihiin. Waa dhif inaad TB ka qaado qof ku ag fadhiyo oo TB qabo sida baska ama tareenka gudahiisa, sababtoo ah waxaa loo baahan yahay in saacado badan qofka cudurka qabo la ag joogo ka hor intii halis cudur-qaadasho ku gaarin. TB **laguma** gudbiyo candhuuf la tufey ama kala qaybsiga bikeeri, saxan ama qaado iyo waxyaabaha cuntada lagu cuno.

## Waa maxay calaamadaha TB?

Dadka qabo cudurka TB waxay lahaan karaan qaar ka mid ah calaamadahaan:

- Qufac socdo in ka badan seddax usbuuc
- Xummad (heer kul sare)
- Dhidid badan habeenka
- Culeyska si aan macno leheen oo hoos u dhaco
- Daal (caajis aad u xun)
- Gaajo la'aan

Qaaxada wuxuu keeni karaa qufac markuu saamayn ku yeesho sambabtaada oo kaliya. Haddii qaaxada gelo qaybo kale ee jirka wuxuu xittaa sababi karaa xannuun iyo jir barar. Dhammaan calaamadahaan/astaamahaan waxay xittaa tilmaami karaan dhibaatoyin kale oo aan eheyn TB, sidaas awgeeda haddii aad ka wel-welsan tahay la hadal takhtar ama kaaliyaha caafimaad ee rugtaada caafimaad ama kiliniko.

## Sidee loo cudur-aqoonsadaa TB'da?

Haddii takhtarka u maleeyo inaad qabtid qaaxada sambabta ama dhuunta waxay kaa codsan doonaan inaad siido saambalka candhuuftaada, kaasoo ay ka baari doonaan jeermiska TB'da. Haddii takhtarka u maleeyo inaad TB ku qabtid qayb kale ee jirkaaga, waxay samayn karaan isla baaritaan ayagoo isticmaalaaya saambalka unugyada jirka, dareere ama maqaar. Waxaa xittaa lagugu samayn karaa baaritaanka maqaarka, iyo dhiigga ama raajada feeraha.

## Haddii aan qabo TB, miyaan u baahanahay in isbitaal la i jiifiyo?

Badanaa dadka TB qabo uma baahno in isbitaal la jiifiyo, inkastoo suurtogal ah in isbitaal lagu jiifiyo si loo xaqiijiyo cudur-aqoonsiga ama haddii uu jirkaaga caabbi ka noqdo ama u adkeysto badanaa daawoyinka loo isticmaalo daaweynta TB.

## Waa maxay halista uu ku jiro qoyskeyga?

Haddii lagugu ogaado qaaxada faafa, kaaliyaha caafimaadka TB waxay kaa codsan doontaa inaad siido liiska dadka badanaa kula joogo. Isbitaalka ayaa markaa dadkaas lagu casuumi doonaa sidii looga baaro TB'da. Waxaa laga baari doonaa calaamadaha TB waxaana lagu samayn karaa baaritaanka maqaarka ama raajada feeraha.

## Waa maxay daaweynta TB?

Takhtarkaaga TB wuxuu badanaa kugu bilaabi doonaa afar daawo kala duwan. Waxay kala yihiin:

- Rifampicin
- Isoniazid
- Pyrazinamide
- Ethambutol

Waxaa suurto gal ah in dhammaan daawoyinkaan lagugu siiyo hal kaniini lagu magacaabo Voractiv. Isoniazid, Rifampicin iyo Pyrazinamide waxaa lagugu siin karaa hal kanini lagu magacaabo Rifater.

Labo bilood ka dib, daaweynta waxaa badanaa laga dhigaa labo daawo, oo kala ah Isoniazid iyo Rifampicin. Daawoyinkaan waxaa lagugu siin karaa hal kanini lagu magacaabo Rifinah .

## Daawoyinka TB miyey sababi karaan waxyeello xun?

Daawoyinka TB waxay sababi karaan waxyeello xun (ficil-celin xun), laakiin qof walba kuma dhaco. Waxyellada caadiga ah waxaa ka mid ah:

- Lalabbo ama madax-wareer
- Firiiricyada jirka ka soo baxo
- Jirka oo loo maleeyo in cirbado ku mudaayaan
- Caalamadaha hargabka





Xaalado dhif ah dadka waxaa ku dhici karo cagaarshow, oo ah markii maqaarka iyo indhaha huruud noqdaan. **Haddii uu kani kugu dhaco, daawada jooji iyo isla markiiba takhtarkaaga u tag.**

Rifampicin waxay kaadida ama dareeraha jirka sida ilinta, ka dhigi kartaa midabka oraanjiga ama casaan. Gaar ahaan *waxuu yareeya saamaynta daawada hormoonka ee uurka looga hortago* (kaniini, ama wax kale ee daawada ku jirta).

Ethambutol si dhif ah ayuu u sababi karaa dhibaato dhinaca aragga (mugdi ama dhax galka midabyada casaanka/cagaarka). Takhtarkaaga ayaa kuu qaban-qaabin doono in baaritaanka indhaha lagugu sameeyo ka hor intii aadan bilaabin daawada Ethambutol. **Haddii dhibaato dhinaca aragga kugu dhaco intii aad ka qaadaneyso Ethambutol, fadlan jooji daawada iyo si deg-deg ah u sheeg takhatarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad.**

## Xasuuso:

- ➔ Waa muhiim inaad takhtarkaaga u sheegto inaad qaadato daawada TB markii daawoyin kale laguu qoro
- ➔ Haweenada waa inay isticmaalaan habab kale ee looga hortago uur-qaadka markii ay isticmaalaayaan daawada TB
- ➔ Takhtarkaaga ama kaaliyahaada caafimaad ee TB u sheeg haddii waxyeello qabtid

## Halkee ka heli karaa taageerid?

Haddii aad qabtid TB, waxaa jiro caawinaad aad heli kartid sidii aadan u dareemin keli ahaan.

Kaaliyahaada TB ayaa halkaas joogto si ay kugu taageerto daaweynta qaaxada. Hubi inaad tegto dhammaan ballamada iyo u sheeg xirfadlayaasha caafimaad haddii aad dhibaato ku qabtid qaadashada kaniiniyaashaada.

Waxaa faa'iido lahaan karo inaad la hadasho qof kale oo TB qabo oo iminka roonaadey. Digniin-bixinta TB (TB Alert), waa urur samafal qarameed ee horyaal ku ah qaaxada dalka UK, waxayna kula xiriirin karaan xubin ka mid ah **Kooxda Wax-qabadka Qaaxada (TB Action Group (TBAG))** oo ku farxi doono inuu kula sheekeysto iyo kugu caawiyo daaweyntaada.